

Muddada karantiilka safarka ee dadka difaacan iyo carruurta ka yar 12 sano oo la soo gaabiyay

Dadka difaacan iyo carruurta ka yar 12 sano way ka bixi karaan karantiilka safarka haddii saddex maalmood kaddib markii ay dalka soo galeen tijaabo laga qaado oo cudurka laga waayo.

- Karantiilka safarku waa tillaabo u muhiim ah ka hortagga cudurka dibedda ka imaanaya. Dadka difaacan weli cudurku waa ku dhici karaa wayna sii gudbin karaan, laakiin halista loogu jiro in taasi dhacdo ayaa ah mid aad uga yar tan dadka aan difaacnayn. Waxaan sidaas darteed qabnaa in ay sax tahay in kooxdaan loo soo gaabiyay muddada karantiilka, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Si karantiilka safarka looga baxo waa in ay jirtaa tijaabo PCR ah oo la qaaday ugu horrayn saddex maalmood kaddib markii dalka la soo galay, taas oo caddaysay in aan qofku cudurka qabin. Tijaabada noocan ah waxay halistii qaadista cudurka hoos u dhigeysaa boqolkiiba 75 ilaa 90 marka la barbardhigo in aan tijaabo la qaadin ama karantiil la gelin. Waa in la caddayn karo in la difaacan yahay ayada oo la gelayo bogga [helsenorge.no](https://www.helsenorge.no), haddii tusaale ahaan qofka looga shakiyo in uu jebiyey waajibkii karantiilka.

Carruurta oo karantiilka loo gaabinayo

Sida uu sheegay Machadka caafimaadka dadweynuhu (FHI) in ka yar dadka waaweyn ayay carruurta cudurka fidiyaan, waxaana la qiyaasayaa carruurta ka yar 12 sano in ay boqolkiiba 50 in ka yar halista dadka waaweyn ugu jiraan in cudurku ku dhaco.

- Ayada oo taas lagu salaynayo ayay Agaasinka caafimaadka iyo FHI waxay qabaan in xeerarka karantiilka ee aan hadda ku soo rognay dadka difaacan in ay sidoo kale khuseeyaan carruurta ka yar 12 sano. Dawladdu taas ayay taageersan tahay, ayuu yiri Høie.

Dawladdu waxay Agaasinka caafimaadka iyo FHI ka codsatay in ay sidoo kale qiimeeyaan dhallinyarada u dhexaysa 12 iyo 18 sano in ay karantiilka safarka uga bixi karaan ayaga oo keena tijaabo PCR ah oo cudurka laga waayay, taas oo la qaaday saddex maalmood kaddib.

- Waxaa hadda la ogaaday in cirbadda koowaad ee tallaalka in laga yaabo in ay hooseeyso inta ay difaaci karto fayraska nooca delta. Waxaa sidaas tarteed dhici karta in la soo rogo xeerar kale uu khuseeya dadka tallaalka buuxa qaatay. Sidii horey loo sheegay ba Agaasinka caafimaadka iyo FHI qiimayn cusub ayay ku samaynayaan goorta dadka tallaalka buuxa qaatay gebi ahaanba laga dhaafi karo karantiilka safarka, ayuu yiri Høie.

Waxay dawladdu u kuurgelaysaa in shahaadada koroonaha ee dalalka kale ama xalalka u dhigma in ay buuxiyaan shuruudaha tayada ee kuwa norwiiijiga, oo ay markaas keeni karaan in karantiilka layska dhaafo, iyo sida loo xaqiijin karo warbixintaas.

Waxaa layskula talinayaa in aan dibedda loo dhoofin

Tijaabada xadka lagu qaadayo waa la sii wadayaa, sababaha loo sii wadayana waxaa ka mid ah in lala socdo noocyada fayraska ee welwelka laga qabo. Waana la wadayaa ilaa iyo inta ay lagama maarmaanka iyo munaasibka tahay.

Dhammaan dadka safarka ah oo ay ku jiraan kuwa difaacan, waa in ay diyaar u yihiin in tijaabo laga qaado marka ay Norway yimaadaan. Dawladdu weli dadka way kala talinaysaa in ay dibedda ugu baxaan safarro aan lagama maarmaan ahayn.

Wax-ka-beddellada karantiilka safarka ee dadka difaacan iyo carruurta ka yar 12 sano waxay dhaqangelayaan laga billaabo 4-ta juun, saacadda 15.00.

Dadkan ayaa lagu qeexay in ay difaacan yihiin:

- dadka qaatay tallaalka buuxa
- dadka qaatay hal cirbad, marki ay cirbadda qaateenna ay ka soo wareegtay 3 ilaa 15 toddobaad

- dadka uu karoonuho ku dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay